



SOMALI FEDERAL REPUBLIC
Ministry of Labor and Social Affairs
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفدرالية
وزارة العمل والشؤون الإجتماعية
مكتب الوزير

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMALIYA
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshad:
Xafiiska Wasiirka

Summad: WSHAB/XW/227/2022

Tar: 19/03/2022

Ku: Dhammaan Hay'adaha ka shaqeeya Shaqo siin Dibadeed

=Muqdisho=

Ku: Hay'adda Amniga Garoomada Diyaarada Soomaaliya

=Muqdisho=

Ku: Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed

=Muqdisho=

Ku: Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliyeed

=Muqdisho=

Ku: Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada

=Muqdisho=

Ku: Wasaaradda Amniga Gudaha

=Muqdisho

Ku: Wasaaradda Arrimaha Dibadda

=Muqdisho

Og: Xafiiska Ra'iisulwasaaraha XFS

=Muqdisho=

Og: Xafiiska Madaxweynaha JFS

=Muqdisho=

Ujeedo: Dhaqangalinta Siyaadadda Shaqosiinta Dibadda iyo Baabi'inta Shatiyaddii horey loo bixinyey

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo ka duulaysa in xirfadlayda iyo xoogsatada Soomaaliyeed ay fursado shaqo ka helaan dibadda si ay u maareeyaan noloshooda, Wasaaraddu waxay hindistay Siyaasadda iyo Habraaca Adeegga Guud ee Shaqosiinta Dibadda, ka dibna waxay horgaysay Golaha Wasiirrada XFS, iyadoo cod aqlabiyad leh ku ansixiyey taariikh **17 June, 2021**.

Haddaba, Wasaaradda oo dhaqangalinaysa Siyaasadda iyo Habraaca Adeegga Guud ee Shaqosiinta Dibadda, sidoo kalena, tixraacaysa Siyaasadda iyo Habraaca cusub ee ay meel mariyeen Golaha Wasiirrada XFS, **Cutubka 2aad, Qeybta 1aad, Faqradaha 3,4 iyo 5 iyo Cutubka 4aad, Qeybta 1aad, Faqradaha 22,23,24, 25, iyo 26.**

Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu wuxuu soo saaray Qodobadan:-

Qodobka 1aad

Baabi'in Dhammaan Shatiyaddii Hore

a. Waxaa la baabi'iyey dhammaan Shatiyaddii iyo Ruqsadihii la bixiyey ka hor

Siyaasadda iyo Habraaca cusub ee ay meel mariyeen Golaha Wasiirrada XFS;

Address Beside of Jubba Hotel, near East Police Head Quarter, Shingaani – Mogadisho – Somalia,

Email: ministry@mol.gov.so.

- b. Shirkadihii horey u haystay Ruqsad ay bixisay Wasaaradda Shaqada oo ah in ay shaqaale ama xoogsato Soomaaliyeed dibadda ugu dhoofin karaan sababo Shaqosiin Dibadeed darteed, waxaa la siiyey in ay ku shaqeysan karaan Ruqsaddii hore ilaa **1^{da} Abriil, 2022**.

Qodobka 2aad

Wargalin

- a. Waxaa lagu wargalinayaa dhammaan shirkadaha ka shaqeeya Shaqosiin dibadeed in ay dib u cusboonaysiiyaan Shatiyadooda Shaqo iyagoo raacaya nidaamka iyo habraaca cusub ee lagu meel mariyey Siyaasadda iyo Habraaca cusub ee Shaqosiinta Dibadda;
- b. Shirkadaha kale ee danaynaya in ay ka shaqeeyaan Shaqosiin Dibadeed sidoo kale, waxay Ruqsadda Shaqosiin Dibadeed ka qaadan karaan Xafiiska Wasaaradda Shaqada iyagoo raacaya Siyaasadda, Habraaca, iyo Nidaamka isdiiwaangalinta Shirkadaha Shaqosiinta Dibadda;
- c. Dhammaan Hay'adaha Dawladda Federaalka Soomaaliya ee ay warqaddani sida tooska ah ugu socoto waxaa lagu wargalinayaa in aysan u ogolaan Shirkadaha ka shaqeeya Shaqosiin Dibadeed in aysan dhoofin karin Shaqaale Soomaaliyeed laga billaabo Taariikh **1^{da} Abriil, 2022**, kaliya waxaa ka shaqeyn kara Shaqosiin Dibadeed Shirkaddii dib loogu cusboonaysiiyo Ruqsadda Shaqosiin Dibadeed, soona buuxisay shuruudaha Siyaasadda, Habraaca iyo nidaamka Adeegga Guud ee Shaqosiinta Dibadda ee la meel mariyey **2021**.

Wabbillaahi Towfiq,

Mudane Xil. Cabdiwahab Ugaas Xuseen Ugaas Khalif
Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha
Bulshada, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya



Address Beside of Jubba Hotel, near East Police Head Quarter, Shingaani – Mogadisho – Somalia,

Email: ministry@mol.gov.so